DIGILLÄ
OPIN PORTAILLE

# Tilmaan faseex ah oo wax lagu barto

Diak
SDO SUOMEN DIAKONIAOPISTO
Elinkeino-, liikenne- ja ympäristökeskus
Vipuvoimaa EU:lta 2014–2020
Euroopan unioni
Euroopan sosiaalirahasto

# DULUCDA


**HORDHAC** 3

**NIDAAMYADA WAXBARASHO EE FINLAND** 4

Waxbarashada aasaasiga ah (dugsi hoose dhexe) 4
Waxbarashada aasaasiga ee dadka waaweyn 5
Heerka labaad oo ah dugsi sare iyo waxbarashada xirfadaha 6
Waxbarashada sare oo ah waxbarshada xirfadaha sare iyo jaamacadaha 7
Waxbarashada xirfadaha sare ee furan iyo jaamacadaha furan 7
Machadka xadaaradaha waxbarashada furan 7

**DALBASHADA WAXBARASHOOYINKA FINLAND** 9

Waxbarashada aasaasiga ah waxbarashooyinka ka dambeeyey si wadar u dalbashada oo ah heerka labaad si wadar ah u dalbashada 9
Dalabka joogtada ah 10
Waxbarashooyinka xirfadaha sare si wadar ah u dalbashada 10
Marinada waxbarashada 10
Si wadar ah u dalbashada dalabka marinka waxbarashada 11
Dalabyada xirfadda luqadda 12

**QAABABKA KALA DUDUWAN EE WAX LAGU BARTO** 13

**KAALMOOYINKA WAXBARASHADA** 15

Kaadhadhka ardeynimada 15
Cunto lacag la'aan ah ardeyda waxbarashada xirfadaha sare iyo kaalmadda cuntada 15
Kaalmadda safarada iskuulka 15
Kaalmadda waxbarashada 16
Kaalmadda waxbarashada dadka waaweyn 16
Kaalmadda shaqo la'aanta ee skaa wax u barashada aad doorashadeeda adigu leedahay 16
Lacagta maalinlaha ee heshiiska waxbarashada iyo magdhowga safarada 16
Daryeelka caafimaadka 16

**WAXAA WANAAGSAN INAAD OGAATID** 19

Ogolaanshaha sharciga ardeynimada 17
Aqoonsashada takhasuska 17

**XIRFADAHA WAXBARASHAD** 18

# HORDHAC

Tilmaan faseex ah oo wax lagu barto- tilmaantan waxaa lagaga waramayaa waxbarashada Finland.
Tilmaantan waxaa lagu soo koobay warbixino fikradaha waxbarashada la xidhiidha iyo mowduucyadooda.
Intaa waxaa dheer oo tilmaamaha ku jira tababaro, kuwaas oo loo adeegsan karo waxbarashadaada oo- xirfadaha lagaga baarandegi karo laguna kobcin karo.
Tilmaamuhu wuxuu ku habboon yahay iskaa inaad u isticmaashid ama macluumaad ahaan shaqooyinka hagitaanka dhaqamada kala duduwan.

Tilmaan faseex ah ee wax lagu barto waxaa lagu soo saarey qeyb ahaan Mashruuca- Digillä opin portaille (ESR).
Mashruucani wuxuu shaqaynayaa sanadaha 2022–2023.
Mashruuca hadafkiisu waa in lagu kaalmeeyo dadka dalka u soo guurey haweenka waxbarashadooda- iyo xirfadaha shaqaaleysiintooda.

## TILMAANTAN ADIGOO ADEEGSANAYA:

- **Waxaad warbixin** ka heleysaa nidaamka waxbarasho ee iskuulada Finland.
- **Waxaad warbixin** ka heleysaa dalbashada waxbarashooyinka.
- **Waxaad warbixin** ka heleysaa hadafyada kala duduwan ee wax lagu barto.
- **Waxaad aqoonsan** kartaa waxa aad ku wabnaagsan tahay.

DIGILLÄ OPIN PORTAILLE · Diak · SUOMEN DIAKONIAOPISTO · Elinkeino-, liikenne- ja ympäristökeskus · Vipuvoimaa EU:lta 2014–2020 · Euroopan unioni Euroopan sosiaalirahasto

# NIDAAMYADA WAXBARASHO EE FINLAND

Finland waajibaadka waxbarashadu wuxuu bilaabmaa sanadkaa,
uu ilmuhu buuxinayo 7 jirka, wuxuuna u soconayaa ilaa iyo 18-jirka.
Hadda wakhtigan waxbarashadu waa lacag la'aan.

## Waxbarashada aasaasiga ah (dugsi hoose dhexe)

Waxbarashada aasaasiga ah ardeydu waxay dhigtaan sanadaha fasalada 1–9.
Halkaas waxay ku bartaan aqoon iyo xirfado loo baahan yahay.
Diyaarinta waxbarashada aasaasiga ahi waxay siisaa ardeygu
inuu u sii gudbo waxbarashada heerka labaad.
Haddii aanad haysanin shahaadada waxbarashada aasaasiga ah ee Finland ama dal kale,
waxaad diyaarin kartaa waxbarashada aasaasiga ah waxbarashada aasaasiga ah ee
dadka waaweyn (fiiri cutubka waxbarashada aasaasiga ah ee dadka waaweyn).

# Waxbarashada aasaasiga ee dadka waaweyn

Waxaad baran kartaa waxbarashada dadka waaweyn ee aasaasiga ah, haddii aanad dhameysanin waxbarashada aasaasiga ah aadna u baahan tahay shahaadada waxbarashada aasaasiga ah, si aad uga sii wadan kartid waxbarashadaada dugsiyada sare ama iskuulada xirfadaha lagu barto. Haddii aad tahay qof weyn oo dalka u soo guurey una baahan tahay in laguu xoojiyo akhriska, qoraalka iyo waxbarashada aasaasiga ah ee bulshada Finland, waxaad ka qeybgeli kartaa waxbarashada asaasiga ah marxaladeeda bilowga waxbarashadooda. Waxbarashada aasaasiga ah ee dadkka waaweyn waxaad ka qeybgeli kartaa isla sanadkaa sanad dugsiyeedka deyrta, marka aad buuxisid 17 jirka

Waxbarashada aasaasiga ah ee dadka waaweyn marxaladeeda bilowga ah duruusteedu waxay u dhigmaan da'aada waajibaadka waxbarashada oo ah fasaladda 1.–6. Waxbarashada dadka waaweynmarxaladda dhammaadka markaad baraneysid waxbarashada aasaasiga ah e fasalada 7.–9. duruustooda. Marxaladda waxbarashada dhamaadkeeda ka dib waxaad dalban kartaa dugsi sare ama waxbarashada xirfadaha. Haddii aad haysatid warbixin iyo xirfad kugu filan, waxaad bilaabi kartaa waxbarashada aasaasiga ah dhammaadkeeda waxbarashada aan lahayn marxaladda koobaad.

Bilowga- iyo marxaladda dhammaadku labaduba waxay qaataan mid walba 1–2 sanadood. Iskuulku inta uu qaadanayaa koleyba waa u gaar shaqsi walba waxayna ku xidhan tahay waxbarashadaadu sida ay u socoto iyo aqoonteeda hore.

## WAXBARASHADA DADKA WAAWEYN EE AASAASIGA AH WAXAAD

- **heleysid** waxbarashada aasaasiga ah shahaadada dhammaadka
- **barashada** waxbarashada aasaasiga ah ee gaarka ah duruustooda ama waxbarashada asaasiga ah ama
- **aad kor u qaadeysid** waxbarashada aasaasiga ah shahaadada dhammaadka dhibcaheeda.

waxaad ka qeybgaleysaa waxbarashada aasaasiga ah ee dadka waaweyn tusaale ahaan dugsiga sare ee dadka waaweyn, machadka waxbarashada, waxbarashada xirfadaha qaarkood iyo machadyada kale. Waxbarashadaas waxaa lagu qaataa finnish ama iswidhish.

Haddii aad dooneysid inaad ka qeyb gashid waxbarashada aasaasiga ah ee dadka waaweyn, Waxaad ka dalban kartaa boos waxbarasho si toos ah xarumaha waxbarashada. Machadyada waxbarashada ayaa iyagu go'aamiya dalbadayaasha iyo dooroshooyinka. Waxaad ka heleysaa warbixin dheeraad ah waxbarashooyinka iyo dalbashadooda Marinka waxbarashada ama xarumaha waxbarashada bogooda shabakada.

# Heerka labaad oo ah dugsi sare iyo waxbarashada xirfadaha

Waxbarashada aasaasiga ah ka dib waxaa loo gudbayaa ardeynimada dugsi sare ama waxbarashada iskuuladda xirfadaha.

Waxbarashada guud ee dugsiga sare,
oo ah inaan halkaa laga diyaarinin wax xirfad ah oo la og yahay.
Dugsiga sare ardeydu waxay ku diyaariyaan shahaadada dugsiga sare.

Waxbarashada xirfadaha waxaa lagu diyaariyaa xirfadaha,
tusaale ahaan daryeelka caafimaadka, cunto karinta, shaqaalaha
dhismaha, hagayaasha carruurta iyo koronto rakibayaasha.
Waxbarashada xirfadaha ee aasaasiga ah dulucdooda
xirfadaha aasaasiga ah ee looga baahan yahay xirfadaha barashadooda waxaa lagu
bartaa iskuulada iyo sidoo kale goobaha shaqada waxbarashada ka dhacda.
Shahaadada xirfadaha ee aasaasiga ah waxaa u dheer oo aad ku diyaarin
kartaa qeyb takhasuska ka mid ah iyo shahaadadda xirfadaha.
Sidoo kale qeyb takhasuska ka mid ah ama takhasuska
xirfadaha ah waxaa lagu heli karaa shaqo
tusaale ahaan caawiyayaasha- xanaaneynta dadka jilicsan ama hagayaasha iskuulada.

Takhasuska xirfadaha waxaad ku diyaarin kartaa sidoo kale heshiis waxbarasho.
Heshiiska waxbarasho waxaa looga jeedaa,
in takhasuska lagu diyaariyo xidhiidhka shaqada ee goobta shaqada iyo
isla markaana in la diyaariyo takhasuska xirfadda.
Heshiiska waxbarasho waxaa lagu soo dejin karaa diyaariyaha,
goobtiisa shaqada iyo machadkiisa dhexdooda.

Waxbarashada heerka labaad sida qaalibka waxay qaadataa 3 sano.
Dugsiga sare iskuulada xirfadaha ka dib waxbarashada
waxaa laga sii wadan karaa waxbarashada sare.

Haddii aad awoodi weydid inaad baratid waxbarashada heerka labaad,
waxaad ku xoojin kartaa aqoontaada luqada finnishka iyo xirfadaada waxbarasho,
adigoo ku noqda dulucda waxbarashada aasaasiga ah sidoo kalena
soo barbarta waxbarashada heerka labaad ee
takhasuska waxbarashada lagu tababaranayo oo ah waxbarashada- TUVA.
Waxbarashada-TUVA waxay qaadataa ugu badnaan hal sano.

# Waxbarashada sare oo ah waxbarshada xirfadaha sare iyo jaamacadaha

Waxbarashada xirfadaha sare waxbarashadoodu waxay xoogga saaraan
shaqooyinka iyo shaqo kobcinta.
Jaamacada waxbarashadoodu waxay culeyska saaraan
aqoonta cilmi baadhista sameyntooda.
Waxbarashada xirfadaha waxaa ka soo baxa
tusaale ahaan injineer, kalkaaliso caafimaad ama arrimaha bulshada.
Halka jaamacadana ay ka soo baxaan
tusaale ahaan cilmi baadhe, macallinimo, dhakhtar ama qareen.
Labadaba waxaa lagu diyaarin karaa darjada hoose iyo tan
kore ee takhasuska waxbarashada xirfadaha sare.
Waxbarashada xirfadaha sare darajadeeda hoose waxaa
lagu diyaariyaa meelahaa 3–4 sanadood,
markaas ka dibna waxbarashada xirfadaha sare darajadeeda sare meelahaa 1,5–2 sanadood.

# Waxbarashada xirfadaha sare ee furan iyo jaamacadaha furan

Waxbarashada xirfadaha sare ee furan iyo jaamacadaha furan
waxaad ka baran kartaa takhasusyada khuseeya waxbarashooyinka
aasaaska u ah waxbarashadaada iyadoonan ku xidhneyn da'adaada.
Ku dhawaad dhammaan waxbarashada sare waxay diyaariyaan iskuuladda furan.

Waxbarashada xirfadaha sare ee furan ama jaamacadaha waxaad ka baran kartaa
duruusta (sida xirfadda arrimaha bulshada) gebi ahaanba
duruusta oo dhan (sida waxbarashada aasaasiga ah)
ama taxane waxbarasho oo hal hal ah (sida sababaha badbaadadda carruurta).

Waxbarashada xirfadaha sare ee furan iyo jaamacadaha duruustoodu
sida badan waa lacag.

# Machadka xadaaradaha waxbarashada furan

Finland waxaad ka baran kartaa sidoo kale tusaale ahaan
kulliyadaha madaniga ah, machadyada dadweynaha ama jaamacadaha xagaaga.
Waxbarashadu waxay u furan tahay cid walba inta badana waa lacag.
Machadyada xadaaradaha waxbarashada
waxaa lagu bartaa sida luqadaha,
jimicsiyada ama waxyaalada xirfadaha ah oo kale.

**Waa maxay waxbarashada aad soo qaadatey ee aad haysatid?**
**Halkan ku qor.**

**Maxaad dooneysaa inaad marka xigta baratid?**
**Halkan ku qor.**

## WAXAAD KA BARBARAN KARTAA XIRFADAHA KALA DUDUWAN IYO MARINADA WAXBARASHADA INTERNETKA TUSAALE AHAAN

- **www.opintopolku.fi**
- **tyomarkkinatori.fi/ammattitieto**
- **opinportailla.diak.fi/valitse-oma-polkusi-2**

Fur telefoonkaaga kameradiisa kuna qabo markaas QR-koodhka.
Riix linkiga kuu furmaya waxaadna toos u galeysaa bogga internetka.

# DALBASHADA WAXBARASHOOYINKA FINLAND

Waxbarashada waxaad ka dalban kartaa
heerka labaad si wadar ah u dalbashada,
waxbarashooyinka sare si wadar ah u dalbashada
ama dalbashada joogtoda ah.
Heerka labaad si wadar ah u dalbashadeeda waxaa lagu dalbadaa waxbarashooyinka xirfadaha ee aasaasiga ah iyo dugsiyada sare.
Waxbarashooyinka sare ee si wadar ah u dalbashada iyo jaamacadaha.
Ku dhawaad dhammaan waxbarashooyinka Finland waxay
ka tirsan yihiin si wadar ah u dalbashada.
Waxbarashooyinka Finland waxaa laga dalbadaa adeegyada
marinada waxbarashooyinka dhinacooda.

Si wadar ah u dalbashada waxaa la qorsheeyaa sanadkii laba jeer, deyrta iyo gugga.
Gugga waxaa la dalbadaa deyrta soo socota waxbarashooyinka bilaabmaya
deyrtana waxaa la dalbadaa janaayo waxbarashooyinka bilaabmaya.

Haddii aad meel kale oo aan ahayn Finland ku soo diyaarisay waxbarashada aasaasiga ah,
waxaad dalbaneysaa waxbarashooyinka heerka labaad ee lagaga fikirayo waxbarashooyinka dalka dibadiisa ee aad shahaadadaada ka haysato.
Haddii aad adigu horey xirfad u haysatey ama waxbarashada
xirfadaha ee sare oo meel kale ah,
waxaad ka sii wadan kartaa waxbarashadaada Finland.
Waxay noqoneysaa inaad hubiso,
in aad tahay qof ku habboon dalbashada waxbarashada aad dalbaneysid.

## Waxbarashada aasaasiga ah waxbarashooyinka ka dambeeyey si wadar u dalbashada oo ah heerka labaad si wadar ah u dalbashada

Heerka labaad ee si wadar ah u dalbashada waxaa lagu dalbadaa
waxbarashooyinka aasaasiga ah ee xirfadaha, waxbarashada dugsiyada sare
iyo takhasusyada tababaridda waxbarashooyinka (TUVA).
Heerka labaad si wadar ah u dalbashada waxaa la qorsheeyaa gugga waxbarashaduna
waxay bilaabantaa deyrta.
Heerka labaad si wadar ah u dalbashada waxaa loogu talgalay kuwa soo dhameeyey
waxbarashada aasaasiga ah, jkuwa aanan lahayn takhasusyada
xirfadaha, waxbarashada dugsiga sare ama
takhasusyada waxbarashada xirfadaha sare.

# Dalabka joogtada ah

Waxbarashooyinka xirfadaha ama dugsiyada sare waxay sidoo kale laga dalban karaan codsiga joogtada ah dhinaciisa.
Dalabyada joogtada ah xilligga dalabkooda iyo qaabka dalabku waxay isku bedbedalaan machadyada.
Waxaad ka heleysaa warbixin dheeraad ah machad kasta bogooda shabakada ama adeegyada marinada waxbarashada.
Waxaad dalban kartaa waxbarashooyinka dalabka joogtada ah,
Haddii aad adigu haysatid waxbarasho hore oo aad ka qaadatey Finland ama dalka dibadiisa ama aad shaqeysatid aadna dooneysid inaad shaqada badalato.

# Waxbarashooyinka xirfadaha sare si wadar ah u dalbashada

Waxbarashooyinka xirfadaha sare si wadar ah u dalbashada waxaa laga dalbadaa waxbarashooyinka xirfadaha sare iyo jaamacadaha.
Dhammaan waxbarashooyinka oo dhan laguma dalban karo dalab kasta.
Adeegyada marinka waxbarashada waxaad ka hubin kartaa,
xilligga uu bilaabmayo dalabka waxbarashada aad xiiseyneyso.

Iskuuladda qaarkood waxaad sidoo kale ka dalban kartaa dalabyada dabacsan ee si wadar ah u dalbashada ka baxsan.
Waxaad ka heleysaa warbixin dheeraad ah oo waxbarashooyinka iyo xilliyada laga dalabanayaba adeegyada marinada waxbarashada
iyo machadyadaa bogagooda internetka.

Horey u sii ogow,
miyey ku jirtaa waxbarashada aad dooraneysid waxbarashada codsiga qaab socodka shaqooyinkooda hordhaca ah ama imtixaanada lagu dooranayo.
Imtixaanadaa sida qaalibka ah looma diro baaq gooni ah.

Waxbarashooyink xirfadaha sare ee doorashada waxbarashooyinka waxaa loo isticmaalaa koontada markii ugu horeysey.
Waxaa looga jeeda,
in cadadyo go’an oo goobo waxbarasho ah loo qabto ardeyda,
haddii aanad horey u haysanin takhasuska waxbarashada xirfadaha sare
ama kuwa aanan horey u qaabilin boosaska ardeynimada ee waxbarashada xirfadaha sare.

# Marinada waxbarashada

Marinada waxbarashadu waa maamulka waxbarashadu bogagga shabakada ee ay maareeyaan.
Halkaas waxaa ku jira warbixino waxbarashooyinka iyo machadyada Finland ka jira ah.
Bogagga shabakada ee marinada waxbarashada qof walba wuu geli karaa "Marinkaaga waxbarashada" -adeegooda.
Inaad gudaha u gasho waxaad uga baahan tahay aqoonsiga macluumaadka bangigga, ku hubinta mobilka ama kaadhka aqoonsiga ee jibka leh.
"Marinkaaga waxbarashada" -adeegiisa waxaad ka dalban kartaa waxbarashooyinka, ka arki kartaa natiijada doorashooyinkaaga
kana qaadan kartid aqbalaada booska waxbarashada.
Intaas waxaa dheer oo aad ka hubin kartaa waxbarashada aad diyaarisay.

→ Intaa waxaa dheer **www.opintopolku.fi**

# Si wadar ah u dalbashada dalabka marinka waxbarashada

Codsiga ku soo buuxbuuxi adigoo doorbidaya inaad kombiyuutarka ku soo buuxisid.
Gudaha ugu gal marinkaaga waxbarashada adeegooda
aqoonsiga bangigga, ku hubinta mobilka ama kaadhka aqoonsiga ee jibka leh.

Ka bilow inaad waxbarashada dooratid,
kuwa aad dooneysid inaad dalbatid.
Buuxi codsiyada waxbarashada codsigeeda adigoo u kala qorsheynaya,
in tan ugu sareysana ay tahay dalabka aad dooneysid ee ugu horeeya.
Waxaad noqon kartaa in laguu doorto waxbarashada ugu sareysa,
kan ay dhibcahaagu kuugu filnaanayaan.
Kan liistada ugu hooseeyaana ay noqdaan kuwa codsiga aad rabto laga baajinayo.

Hubi, in aad ku habboon tahay meelaha dalabkaaga aad dooraneysid.
Ku habboonaanshaha dalabka waxaa looga jeedaa,
in adigu aad leedahay aasaas waxbarasho oo kugu filan iyo xirfad luqadeed
waxbarashadaa aad dalbaneysid.
Ku habboonaanshaha waxaad ka hubin kartaa warbixinaha
marinada waxbarashada iskuuladooda.

U Buuxi foomka codsiga talaabo talaabo.
Waxay noqoneysaa inaad leedahay cinwaan iimayl ah,
kaaso o aad ka buuxin karto foomka.

Hubi warbixinaha foomka markaasna dir.
Si wadar ah u dalbashada foomka codsiga waxaa la buuxinayaa mar kaliya
isla aqoonsigaaga shaqsi ahaaneed iyo cinwaanka boostada.
Xilligga codsiga waxaad sameyn kartaa wax ka badelid
tusaale ahaan codsiga waxbarashada qorshihiisa.
Marka xilligga codsigu uu dhammaaday,
codsiga markaas ka dib wax isbedel ah lama sameyn karo.

Natiijada si wadar ah u dalbashada waxaad ka arki kartaa
Adeegga marinkaaga waxbarashada sida jadwalka la soo wargeliyey dhigayo.
haddii laguu doorto waxbarasgadaas,
waxay noqoneysaa inaad ka qaadatid waxbarashadaas si
rasmi ah adeegga marinkaaga waxbarashada.
Waxaad warbixin dheeraad ah ka heleysaa aqbalaadda
iyo waxbarashada bilowgeeda machadka,
kan adiga laguu qaatey.
Si taxadiran u soo barbaro machadku farriimaha ay kuu soo diraan
una dhaqan sida tilmaamuhu dhigayaan.

# Dalabyada xirfadda luqadda

Si aad u baratid luqadda finnishka,
waxaad u baahan tahay aqoonta qaarkood oo ah luqadda finnishka.
Haddii luqadaada hooyo ay tahay luqad kale oo aan ahayn finnish,
machadyadu waxay dalbanayaan inaad soo muujisid
aqoon kugu filan oo luqadda finnishka ah.
Waxbarashooyinka kala duduwan dalabyadoodu waxay kala leeyihiin
inaad muujisid xirfado luqadeed oo kala duduwan.
Soo ogow marinka waxbarashada ee aad xiiseyneysid
waxbarashadooda luqada laga dalbanayo.
Xirfadda luqadaada waxaa lagu qiimeyn karaa
tusaale ahaan marxaladda dalabka wareysigeeda ama
machadku tijaabada luqada ee ay diyaarinayaan.
Waxaad sidoo kale diyaarineysaa takhasuska luqada ee guud ahaaneed (YKI),
taas oo aad ku soo muujin kartid xirfadda luqadda cadeynteeda.

# QAABABKA KALA DUDUWAN EE WAX LAGU BARTO

Waxbarashadu wakhtigan xaadirka ah waa waxyaalo kale oo badan oo aan ahayn fasal ku barashada. Waxay noqon kartaa waxbarasho fasalka oo iskuulka ah, iskaa wax u barasho ama waxbarashada shaashada oo la hagayo, waxbarashada- shabakada ama waxbarashada- qaababka badan, jtaas oo sida qaalibka ah leh qaab kale oo waxbarasho isku xidhan

Ogow inta dalbashada waxbarashada ka horeysa, waa iskuul noocee ah iskuulkani. Isla iskuulkaa waxaa lagaaga fidin karaa qaabab kala duduwan in lagu hirgeliyo. Ka fikir, waxbarasho noocee ah ayaa kugu filan iyo maxaa adiga kuu suurtogalaya.

## TUSAALE AHAAN QAABABKA WAXBARASHADA EE KALA DUDUWAN:

- **Waxbarashada dhow** waa waxbarashada iskuulka ka dhacda, taas oo ay ardeydu ka qeyb galaan iyagoo goob joog ah inta ugu badan maalintii. Waxbarashada dhow waxay ku habboon tahay, kuwa awoodda inay uga qeybgalaan waxbarashada sida joogtada ah.

- **Waxbarashada durugsan** waxaa looga jeedaa waxbarashada, tan amacallinka iyo ardeydu aynan isku meel joogin muuqaal ahaan. Waxbarashada durugsan waxaa loo baahan yahay xidhiidh internet ah, kombiyuutar iyo sameecado. Waxbarashada durugsan waxaa looga qeyb qaataa xidhiidh durugsan, tusaale ahaan Teamsiga, Zoomka ama Google Meetinka. Waxbarashada durugsani inta badan waxay u baahan tahay in looga qeybgalo waxbarashada si joogto ah.

- **Iskaa wax u barashada** waxaa looga jeedaa, in waxbarashadu ay u dhacayso qeyb ahaan ama gebi ahaanba iyadoonan xidhiidh waxbarasho dhow ama durugsani jirin. Iskaa wax u barashadu ma lahan xilli ama goob ay ku xidhan tahay, ee kaliya waxbarashada waxaa casharada lagu diyaarin karaa waxbarashada iskaa. Iskaa wax u barashada waxaa lagu hirgelin karaa sidoo kale adigoo shaqeynaya, laakiin waxay u baahan tahay naftaada inaad culeys saartid aadna ku dhaqantid jadwalka.

- **Waxbarashada qaababka badan** waxaa looga jeeda waxbarashada, tan u dhacaysa qeyb ahaan waxbarashada dhow qeybna sida durugsan. Waxbarasha qaababka badan waxaa ka mid ah inta u badan sidoo kale iskaa wax u barasho badan.

- **Koorsooyinka shabakadu** waa waxbarashooyinka internetka laga diyaariyo, kuwaas sida badan iskaa loo sameeyo, laakiin kuwaasi waxay noqon karaan kuwo ku xidhan waxbarashada. koorsooyinka shabakadu sida badan waxay ku dhisan yihiin aagagga waxbarashada qaarkood.

- Waxbarashooyinkaa waxaa ka mid ah sidoo kale **waxbarashooyinka shaqada ka dhaca ama tababarada**. Markaasna shaqada oo lagugu hagayo ayaad wax ku baraneysaa. Intay qaadaneysa waxay isku bedbedashaa wiigag ama bilooyin dhowr ah. Waxbarashooyinka shaqada ka dhaca ama tababarada inta badan mushahar laguma siiyo ardeyga.

# Qaababka waxbarashada

**Qaababka waxbarashada doorashadeedu waxay saameyn ku yeelan kartaa xaaladda noloshaada iyo ku adkaanshahaaga ardeynimo. Ka dooro liiskan qaababka iskaa wax u barashada kugu habboon.**

- ☐ Waxaan doonayaa intii tamarteyda ah inaan iskey wax u barto.
- ☐ Waxaan u baahanay hagitaan badan oo waxbarashada ah.
- ☐ Waxaan si wanaagsan wax ugu baran karaa koox ahaan.
- ☐ Waxaan si wanaagsan wax ugu baran karaa wax qabashada.
- ☐ Waxaan si wanaagsan wax ugu baran karaa akhriska.
- ☐ Waxaan si wanaagsan wax ugu baran karaa dhgeysiga.
- ☐ Waxaan si wanaagsan wax ugu baran karaa fiirsashada/ daawashada.
- ☐ Waxaan doonayaa inaan gurigga wax ku barto.
- ☐ Waxbarashadu waa inay noqoto mid dabacsan.
- ☐ Waxaan doonayaa inaan iskkulka wax ku barto.

**Waxbarasho qaabkee ah ayaa noloshaada adiga si wanaagsan kuugu habboon? sabab? halkan ku qor.**

# KAALMOOYINKA WAXBARASHADA

Xilligga ardeynimada waxaad heli kartaa dhaqaale kala duduwan.
Kaalmooyinkaa waxaa looga jeedaa kaalmo dhaqaale oo
kala duduwan iyo sidoo kale qiimo dhimisyo,
kuwaas oo aad ku heli kartid ardeynimada.
Kaalmooyinkaasi waxay u kala baxaan da'ada, qaabka waxbarashada
iyo xaaladda shaqaaleysiintu sida ay dhigayso.
Kaalmooyin badan waxaad warbixin dheeraad ah ka heli kartaa bogagga Kelada (kela.fi).

## Kaadhadhka ardeynimada

Markaad dalbaneysid kaadhka ardeynimada,
Waxaad ku heleysaa qiimo dhimis aad isticmaali kartid, laguu soo
fidiyo aad kaga qeybgali kartid munaasabadaha ardeyda.
Kaadhasha ardeydu waxay xaq kuu siinayaan sidoo kale
safarada iyo VR:ta qiimo dhimista ardeyda.
Waxaad u baahan tahay codsiga kaadhka ardeyda markaad
buuxineysid shahaadada ardeynimada.
Waxaa sidoo kale suurtogal ah inaad ku soo dajisato kaadhka ardeynimada
telefoonkaaga dhinaca barnaamijka u gaar ah, tusaale Tuudo.

## Cunto lacag la'aan ah ardeyda waxbarashada xirfadaha sare iyo kaalmadda cuntada

Cuntada lacag la'aanta ahi waxay khuseysaa ardeyda oo dhan
takhasuska aasaasiga ah ee ardeyda iyo waxbarashada- TUVA ardeyda dhiganeysa.
Sidoo kale haddii aad dugsi sare dhiganeysid ama aad
diyaarineysid takhasuska aasaasiga ah xirfadaha,
iskuulka waxaad ku leedahay cunto lacag la'aan ah.
Sidoo kale kaalmada shaqo la'aanta ah ardeyda wax ku barata waxbarashada aasaasiga ahi
waxay xaq u leeyihiin cunto lacag la'aan ah.

Haddii aad dhiganeysid waxbarashada xirfadaha sare,
waxaad kaga cuni kartaa cuntada maqaaxidda ardeyda qiimaha ardeyda.
Si aad ugu iibsan kartid cuntada qiimaha ardeynimada,
waxaad u baahan tahay kaadhka ardeynimada ama cadeynta ardeynimada.

## Kaalmadda safarada iskuulka

Heerka labaad ardeyda dhigataa waxay heli karaan kaalmadda safarada iskuulka,
haddii halka jiho ee safarka iskuulku yahay ugu yaraan 7 kilomitir.

# Kaalmadda waxbarashada

Kaalmadda waxbarashada ujeedadeedu waa in la sugo dakhliga xilligga ardeynimada.
Kaalmadda waxbarashada ee muhiimka ahi waxay ka kooban yihiin lacagta kaalmadda iyo deynta waxbarashada ee dowladdu damaanad qaaday.

Lacagta kaalmadda waxbarashada waa Kela kaalmo dhaqaale oo ay siiso ardeyda.
Cadadkaas oo ku xidhan xaaladaadda nololeed iyo dakhligaaga.

Deynta waxbarashadu waa deyn ay dowladdu damaanad qaado,
taas oo ay tahay in dib loo celiyo.

Haddii Kela ay kuu ogolaato adiga deyntaa la damaanad qaadayo,
waxaad ka dalban kartaa deynta bangigga aad dooratid.

# Kaalmadda waxbarashada dadka waaweyn

Kaalmadda waxbarashada dadka waaweyn waxaa lagu kaalmeeyaa kobcinta xirfadaha waxbarashada dadka waaweyn iyo dib u cusbooneysiinta aqoonta.
Kaalmadda waxbarashada dadka waaweyn waxaa laga heli karaa,
haddii xirfadda shaqo ay tahay ugu yaraan 8 sanadood.
Khibradda shaqo waxay noqon kartaa Finland, wadamada kale ee Yurubta ama wadamada- barigga ama Iswisarland.

# Kaalmadda shaqo la'aanta ee skaa wax u barashada aad doorashadeeda adigu leedahay

Haddii aad tahay shaqo la'aan,
waxaad waxbarashadaada ku suurtogelin kartaa kaalmadda shaqo la'aanta.
Kaalmadda shaqo la'aanta iyo kaalmadda waxbarashada isku mar lama wada heli karo.
ugala heshii waxbarashada mar kasta si gooni ah xafiiska shaqada (TE-toimisto).
Waxaad ka heleysaa warbixin dheeraad ah bogagga xafiiska shaqada.

# Lacagta maalinlaha ee heshiiska waxbarashada iyo magdhowga safarada

Mudadda heshiiska safarada waxaad ka heleysaa heshiiska shuruudaha shaqadu mishaharka uu dhigayo.
Haddii maalmaha waxbarasha fasalka uunan shaqo bixiyuhu ku siineynin mushahar ayna kugu tdhaco adiga mushahar waayitaan,
waxaad ka dalban kartaa machadka lacagta maalinlaha.

Magdhowga safarka waxaad ka dalban kartaa,
haddii halka jiho ee safarkaagu yahay gurigga ama goobta shaqada waxbarashada dhow ee fasalku ay ka badan tahay
10 km (waajibaadka waxbarashadu waa inta ka badan 7 km).

Xilligga heshiiska waxbarashada xaq uma lihid kaalmadda waxbarashada ee Kela da.

# Daryeelka caafimaadka

Heerka labaad ardeyda dhigata iyo ardeyd dhigata waxbarashada xirfadaha sare waxay heleyaan daryeelka caafimaadka ardeyda adeegyadooda.
Daryeelka caafimaadka ardeydu waa u bilaash da'ada ka yar 18-jirka.
Adeegyada kale waxaa la isku dayaa in jabnaan lagu hayo.
Baadhitaanada caafimaadku waa u lacag la'aan dhammaan ardeyda.

# WAXAA WANAAGSAN INAAD OGAATID

## Ogolaanshaha sharciga ardeynimada

Waxaad heli kartaa ogolaanshaha sharciga ardeynimada,
haddii ardeynimadu ay kugu hogaamineyso xirfad ama takhasus.
Waa inaad boos ardeynimo ka haysato goob waxbarasho,
tusaale ahaan machadyada xirfadaha ama waxbarashada xirfadaha sare.

→ Warbixin dheeraad ah: **migri.fi/opiskelu-suomessa**

## Aqoonsashada takhasuska

Haddii aad ku soo diyaarisey takhasuskaaga dalka dibadiisa,
waxaa laga yaabaa inaad u baahto takhasuska ama
shahaadada xirfadda go'aankeed aqoonsiga,
si aad uga shaqeyn kartid ama wax uga baran kartid Finland.
Go'aanka aqoonsashada waxaa sameeya Gudoonka
waxbarashada, masuuliyiinta qeybteeda gaarka ah,
machadka ama waxbarashada xirfadda sare.

Waxaad uga baahan tahay Gudoonka waxbarashada ama
masuuliyiinta kale go'aanka aqoonsashadeeda,
Haddii aad dooneysid inaad ku shaqeysid xirfada nidaamsan ama shaqadooda.
Xirfadaha noocaas ahi waa tusaale dhakhtarka, macallinka iyo xirfadaha kalkaalisadda.

Haddii ay noqoto inaad soo gudbisid shahaado takhasus
oo dalka dibadiisa ah masuuliyiinta finnishka,
waxay noqoneysaa inaad ka soo turjuntid turjumaan shaqada u idman.

# XIRFADAHA WAXBARASHAD

Waxbarashada waxaad ku baraneysaa aqoon cusub iyo xirfado cusub, kuwaas oo ay tahay inaad taqaanid si aad mustaqbalka u isticmaashid. Waxabarashadu waxay kaaga baahan tahay shaqo dadaal leh.

## XIRFADAHA WAXBARASHADU WAA

**XIRFADAHA WAXBARASHADA**

- luqad finnish ah oo kugu filan akhris- iyo qoraalba
- xirfadaha dhijitalka
- koox la shaqeynta

**QIIMEYNTA XIRFADAADA ARDEYNIMO**

- qaababka kugu habboon ee aad wax cusub ku baran kartid
- waxaad ku wanaagsan tahay iyo aqoonsashada baahidaada kobcinteeda

**MAAREYNTA LA SHAQADAADA**

- ku dhaqmidda jadwalada wadar ahaaneed
- jadwal u sameynta waxbarashadaada iyo iskaa u shaqeyntaada

**DHISIDDA IYO KOR U QAADIDDA XIISEYNTAADA**

- xiiseynta barashada arrinta ku aaddan
- rabitaankaaga inaad gaadgid hadafkaaga
- xiiseynta iyo ku guuleysashada

**DARYEELIDDA BADQABKA NAFTAADA**

- isku dheelitirka xilliyada fasaxa iyo xilliyada waxbarashada
- daryeelka karitaankaaga

**Maxaa xirfaddo waxbarasho aad leedahay?**
**Halkan ku qor.**

**Maxaa xirfado ah oo aad ku faa'iidaysaa si aad wax dheeraad ah u sii barato?**
**Halkan ku qor.**

# Aqoonso waxa aad ku wanaagsan tahay.

**Waxa aad ku wanaagsan tahay waa arrimaha, kuwa aad dareemeysid inaad heybad u leedahay iyo kuwa qeyb adiga kaa ah. Ka dooro liistada waxyaala aad ku wanaagsan tahay, kuwa aad leedahay.**

Liiska waxa aad ku wanaagsan tahay:

- ☐ Waxaan ahay curiye.
- ☐ Waxaan ku wanaagsanahay farsamada gacanta.
- ☐ Waxaan ku wanaagsanahay xisaabta.
- ☐ Waxaan ku wanaagsanahay abaabulka.
- ☐ Waxaan ahay daacad.
- ☐ Waan dadaal badanahay.
- ☐ Waxaan ahay kaftan yaqaan.
- ☐ Waxaan jecelahay inaan wax cusub barto.
- ☐ Waan taxadiranahay.
- ☐ Waxaan ahay cadaali.
- ☐ Waan dabacsanahay.
- ☐ Waxaan ahay bulshaawi.
- ☐ Waan ku dhiiradaa.
- ☐ Masuul baan ahay.
- ☐ Dhakhso ayaan wax u bartaa.
- ☐ Waan firfircoonahay.
- ☐ Fikradahaan qani ku ahay.
- ☐ Waxaan ahay caawiye.
- ☐ Waan naxariis badanahay.
- ☐ Waxaan ahay dhagayste fiican.
- ☐ Waan dhiiranahay.
- ☐ Waan xiiseeyaa.
- ☐ Waxaan heybad u leeyahay wada shaqeynta.
- ☐ Waan daganahay.
- ☐ Waan garowsho badanahay.
- ☐ Waxaan ku wanaagsanahay inaan wax cusub alifo.
- ☐ Waan adkeysi badanahay.
- ☐ Waan mahad naqaa.
- ☐ Hogaamintaan ku wanaagsanahay.
- ☐ Kala nidaamintaan ku wanaagsanahay.
- ☐ Waan ku dhaqaaqaa howsha iyadoonan la i dirin.
- ☐ Waan macnesamahay.

**Sidee ayaad waxa aad ku wanaagsan tahay waxbarashadaada ugaga faa'iideysan kartaa? halkan ku qor.**

# Aqoonso waxyaalaha aad xiiseyneysid.

**Ka dooro liiskan mowduucyada aad xiiseyneysid.**

- ☐ Waxaan jecelahay la shaqeynta carruurta.
- ☐ Waxaan jecelahay la shaqeynta dhallinyarada.
- ☐ Waxaan jecelahay la shaqeynta waayeelka.
- ☐ Waxaan jecelahay nadaafadda.
- ☐ Waxaan jecelahay cunto karinta.
- ☐ Waxaan jecelahay qurxinta nafta.
- ☐ Waxaan jecelahay hagaajinta mishiinada.
- ☐ Waxaan jecelahay wax sawiraada.
- ☐ Waxaan jecelahay jimicsiyada.
- ☐ Waxaan jecelahay wax gadista.
- ☐ Waxaan jecelahay cunto foorneynta.
- ☐ Waxaan jecelahay xanaaneyta.
- ☐ Waxaan jecelahay dhar tolowga.
- ☐ Waxaan jecelahay safaradda.
- ☐ Waxaan jecelahay sharaxaada.
- ☐ Waxaan jecelahay isticmaalka kombiyuutada.
- ☐ Waxaan jecelahay xayawaanka.
- ☐ Waxaan jecelahay geedaha iyo dhirta.
- ☐ Waxaan jecelahay baabuur wadista.
- ☐ Waxaan jecelahay dhismaha.

**Xirfad waxbarsho oo noocee ah ayaad xiiseyneysaa oo doorashadaada ku saleysan? Halkan ku qor.**

# Xiiseynta waxbarashada

**Valitse listalta sinua motivoivia asioita.**

- ☐ Inaan sii kordhisto Barashada luqadda finnishka.
- ☐ Inaan sii xoojiyo xirfadeyda dhijitalka.
- ☐ Inaan xirfad yeesho.
- ☐ Inaan barto dad cusub.
- ☐ Inaan barto waxyaalo cusub.
- ☐ Inaan helo shaqo iyo mushahar.
- ☐ Inaan barto in aan arrimahayga kaligay xallisto.
- ☐ Inaan barto sidaan ku noqon lahaa ardey xirfad leh.

**Maxay yihiin arrimaha xiise geliya waxbarashadaadu? Halkan ku qor.**